MINNESOTA
CANNABIS EXPUNGEMENT BOARD

**Dowladda Minnesota waxay dib u eegaysaa diiwaannada la xiriira Kaanabiska**

Sharciga Isticmaalka Kaanabiska ee Dadka Waaweyn ayaa laga ansixiyey Minnesota sannadkii 2023, kaas oo sharciyeeyey isticmaalka kaanabiska dadka waaweyn iyo abuuray fursad lagu tirtirayo dambiyada kaanabiska (marijuana) ee u qalma in la tirtiray.

Guddiga Tirtirka Dambiyada Kaanabiska ayaa la sameeyey si uu u eegaan kiisaska dembiyada culus ee Minnesota iyo qaar ka mid ah kiisaska dembiyada fudud iyo kuwa dhexdhexaadka ah.

**Haddii aad leedahay Dambi Fudud oo la xiriira Kaanabiskar**

Haddii aad hore u lahayd xukun dambi fudud oo la xiriira kaanabiska, diiwaankaaga laga yaabee in hore loo tirtiray. Waaxda Dambiyada Minnesota (Minnesota Bureau of Criminal Apprehension) ayaa si toos ah u tirtirtay qiyaastii 57,000 diiwaanno la xiriira kaanabis. Waxaad booqan kartaa bogga Minnesota Court Records Online si aad u aragto haddii diiwaanka maxkamaddaada la tirtiray.

**Haddii aad leedahay Dambi Culus oo la xiriira Kaanabiska**

Guddiga Tirtirka Dambiyada Kaanabiska ayaa dib u eegi doona dambiyada culus ee u qalma iyo sidoo kale qaar ka mid ah dambiyada fudud iyo kuwa dhexdhexaadka ah. Waxaa jira qiyaastii 110,000 kiis oo la eegi doono. Kiisaskan lama tirtiri karo si toos ah, waxaana loo baahan yahay dib u eegis ballaaran oo qaadan doonta dhowr sano si hab dhammaystiran loo sameeyo.

**Nala soo xiriir:**

ceb@state.mn.us

651-201-2000

**Fiiri Dhinaca Kale ee Boggan si aad u aragto Su'aalaha Badanaa La Isweydiiyo**

## Su’aalaha Badanaa La Isweydiiyo

**Waa maxay tirtiridda diiwaanka?**

Tirtiridda diiwaanka waxaa lagu qeexaa “ka saarid ” wax jira. Macnaha halkan laga leeyahay waa in kiisaska hore ee la xiriira kaanabiska laga saaro diiwaannada maxkamadaha iyo hay’adaha kale ee dowladeed ee kaydiya diiwaannada dambiyada. Diiwaannada la tirtiray kama muuqan doonaan inta badan baaritaannada asalka dambiyada.

**Ma isla nidaamka Sharciga “Clean Slate Act” baa?**

Maya. Sharciga Clean Slate Act wuxuu oggolaanayaa in diiwaanno dambiyeed gaar ah si toos ah loo xiro kadib marka muddo go’an laga joogo. Sharcigan wuxuu khuseeyaa dhowr nooc oo kiisaska dambiyeed ah, oo ay ku jiraan diiwaannada kaanabiska.Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa bogga Waaxda Ammaanka Dadweynaha ee Minnesota ee ku saabsan tirtirka diiwaannada.

**Sidee Guddiga Tirtirka Dambiyada Kaanabiska (CEB) u kala hormarinayaa kiisaska?**

CEB hadda waxay dib u eegaysaa kiisaska ay salka ku hayaan haynta daroogada heerka 5-aad , marka laga reebo xaalado gaar ah..

**Ma u baahanahay inaan codsi gudbiyo si kiiskeyga loo eego?**

Maya, uma baahnid inaad codsi dirto. CEB waxay si toos ah u eegi doontaa kiisaska iyadoo ku salaynaysa u-qalmidda.Si kastaba ha ahaatee, waad codsan kartaa in kiiskaaga hore loo eego. Booqo mn.gov/ceb si aad u gudbiso macluumaadkaaga oo aad uga codsato in kiiskaaga si degdeg ah loo eego.

CEB waxay u socotaa dib-u-eegista kiisaska sida ugu dhakhsaha badan, iyadoo si taxaddar leh u eegaysa mid kasta oo kiis ah si gaar ah. Tani waxay qaadan kartaa waqti, gaar ahaan kiisaska adag.Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa bogga CEB ee mn.gov/ceb.

**Sideen ku ogaan karaa in kiiskeygu u qalmo dib-u-eegis??**

Akhri tilmaamaha buuxa ee u-qalanka dambiyada culus bogga mn.gov/ceb.

**Maxay Guddiga Tirtirka Dambiyada Kaanabiska (CEB) tixgeliyaa marka uu dib u eegayo kiisaska?**

Kiisaska ay ku lug leeyihiin hub khatar ah ama rabshado, ama weli loo tixgeliyo dambi culus sida uu hadda yahay sharcigu, ma u qalmaan in la tirtirayo .Kiisaska u qalma, waxaa jira tuhun ah in la tirtirayo diiwaanka ilaa iyo inta aan la helin caddayn xooggan oo muujinaysa in ay jirto khatar amni oo bulshada ah.

Habka dib-u-eegista ee CEB waa nidaam dhowr qaybood ka kooban , waxaana lagu daraa tixgelinta hadallada ama qoraallada booliska ama dhibbanayaasha.

**Yaa go’aamiya in kiiska la tirtirayo (expunged)?**

Guddiga Tirtiridda Kiisaska Cannabis (Cannabis Expungement Board) ayaa go’aamiya kiisaska la tirtirayo. Guddigan wuxuu ka kooban yahay shan xubnood. Bil kasta, guddigu wuxuu qabtaa kulan dadweyne oo si qarsoodi ah kiisaska lagu soo bandhigo (aan magacyada la sheegin). Ugu yaraan saddex xubnood ayaa u baahan inay u codeeyaan si tallaabo looga qaado kiis kasta. Haddii aad rabto inaad wax badan ka ogaato xubnaha guddiga ama kulamadooda, fadlan booqo qaybta “Board Information”.

**Sidee baan u hubin karaa xaaladda kiiskeyga?**

Waxaad nagala soo xiriiri kartaa si aad u ogaato xaaladda kiiskaaga adigoo isticmaalaya foomka “Contact Us”. Isku day inaad bixiso macluumaad badan intii suurtagal ah si aan si degdeg ah kuugu caawinno. Fadlan ogow in kiisaska loo bandhigo guddiga ay yihiin kuwa si qarsoodi ah ku salaysan, sidaas darteed ma xaqiijin karno goorta kiiskaaga la dhageysan doono, mana ka hadli karno go’aanka ay guddigu gaari karaan.

**Sideen ku ogaan doonaa haddii kiiskeyga la tirtiray?**

Haddii guddigu go'aansaday in kiiskaaga la tirtiro, waxaad boostada ku heli doontaa warqad kuu sheegaysa go’aanka guddiga. Haddii aad heshay warqad oo aad qabto su’aalo, fadlan buuxi foomka “Contact Us” adigoo bixinaya macluumaadkaaga, waxaana isku dayi doonaa inaan ka jawaabno su’aalahaaga ama aan kuu tilmaanno ilaha kale ee la xiriira tirtiridda kiisaska.